

Xaaladaha uurka iyo Tallaalada COVID-19

Xilliga uurka waxaa lagu taliyay in la qaato tallaalka COVID-19

- Dhammaan dadka uurka leh, kuwa dhawaan uur qaaday, kuwa naas nuujinaya, iyo kuwa ka fakaraya inay uur qaadaan waxaa la talinaya kuliyaadaha Maraykanka ee dhaqaatiirta dhallaanka iyo haweenka inay qaataan tallaalka COVID-19.
- Khatar badan ayay ugu sugan yihiin inay qaadaan COVID-19 dumarka uurka leh marka la bar-bar dhigo kuwa aan uurka laheyn.
- Hooyada uurka leh ee la xanuunsan COVID-19 ilmaheedu halis ayuu geli karaa.
 - Waxaa laga yaabaa inay sii korodho khatarta dhalimada la xidhiidha ee dumarka laga helay COVID-19 markay uurka leeyihiin, waxaana jirta khatar sii kordhaysa dhalimada ka hor.
- Qaadashada tallaalka COVID-19 hooyada kaliya difaac uma ahan ee sidoo kale wuxuu ilaaliya ilmaha dhawaan dhashay.
 - Daraasaduhu waxay sheegayaan inay yartahay halista soo gaaraysa dhallaanka laga tallaalay COVID-19 xilliga uurka khasatan lixda bilood ee ugu horraysa.
- Qaado tallaalka COVID-19 si uu kaaga difaaco jirrooyinka khatarta ah haddii aad uur leedahay.
- Horay malagaaga tallaalay COVID-19? Ku dadaal inaad qaadato hal qiyaas oo ah tallaalka COVID-19 sanadka 2025-26 taasoo la cusboonaysiiyay.

COVID-19 waa ammaan xilliga uurka

- Daraasaduhu waxay sheegayaan in tallaalka COVID-19 ammaan yahay xilliga uurka iyo inta lagu guda jiro naas- nuujinta.
- Haddii aad su'aalo qabto la hadal dhaqtarkaaga.

Badqab ayuu u leeyahay tallaalka COVID-19 dadka doonaya inay mar un carruur dhalaan.

- Waxaa lagula talinayaa inaad qaadato tallaalka COVID-19 haddii aad hadda doonayso inaad mustaqbalka uur qaado.
- Ma jiraan wax caddenaya in tallaalka COVID-19 waxyeelo u gaysto dhalitaanka ilmaha.

Minnesota Department of Health
PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
www.health.state.mn.us/immunize

09/19/2025

To obtain this information in a different format call 651-201-5414.